TALAALKA Busbuska/Hablo baaska

WAXAAD U BAAHANTAHAY IN AAD KA OGAATO

1 Maxaad isu talaalaysaa?

Busbuska/Hablo baas (waxaa kale oo lagu magacaabaa varicella) waa cudur caan ah oo caruurta ku dhaca. Sida badan waa cudur xanuunkiisu aanu aad u darneyn, laakiin wuxuu noqon karaa mid khatar daran leh, gaar ahaan marka uu ku dhaco caruurta murjuxa/muluqa ah iyo dadka waaweyn.

- Waxuu keenaa shuruurac, cuncun, qandho/xumad, iyo daal.
- Wuxuu keenaa infakshan aad u xun oo maqaarka ku dhaca, nabro, nimooniya/koolba aaryo, dhaawac maskaxda gaara, ama dhimasho.
- Feyraska busbuska keena wuxuu qof cudurka qabaa dadka kale ugu gudbin karaa hawada, ama hadii ay qofka kale jirkiisa gaaraan dhacaanka finanka busbuska ka yimaada.
- Qof uu mar hore busbus ku dhacay sanado kadib waxaa ku dhici kara cudur la yiraahdo shingles (cudur maqaarka ay finan xanuun iyo cuncun leh una eg busbus).
- Intii aan talaalka la bilaabin kahor, sanad kasta dad qiyaastii tiradoodu ay gaareyso 11,000 ayaa Mareykanka gudihiisa cusbitaalada loo seexin jiray cudurka busbuska dartiis.
- Intii aan talaalka la bilaabin kahor, dad tiradooda lagu qiyaasi karo 100 qofood ayaa u dhiman jiray cudurka busbuska Mareykanka gudihiisa.

Talaalka busbuska wuxuu ka hortagaa cudurka busbuska.

Dadka qaata talaallka busbuska badidooda kuma dhaco cudurka busbuska. Laakiin hadii qof laga talaalay busbuska uu ku dhaco cudurka busbuska, sida badan mashaqada cudurka mid weyn ma noqoto. Finan tiradoodu yar tahay ayaa ka soo baxa, umana badna in ay qandho/xumad qabato, si degdeg ahna wey u bogsoodaan.

2 Yaa qaadanaya talaalka busbuska goorma ayuuse qaadanayaa?

Nidaamka

Caruurta uusan waligood ku dhicin busbusku waa in la siiyaa labo talaal oo talaalka busbuska ah marka ay da'ahan soo socda jiraan:

Talaalka 1 aad: 12-15 bilood jirka marka ay yihiin
Talaalka 2 aad: 4-6 sano jirka marka ay yihiin (ka hor ayaa la siin karaa, hadii ay ugu yaraan 3 billod ka soo wareegtay markii talaalka hore la qaatay)

Dadka 13 jirka iyo wixii kabadan jira (oo uusan cudurka busbusku weligood ku dhicin ama aanan qaadan talaalka busbuska) waa in ay qaataan labo talaal oo ay ugu yaraan u dhexeyso 28 maalmood.

Ka Daba-Geyn

Caruurta iyo da'yarta ee aan si buuxda loo talaalin waa in la siiyaa hal ama labo talaal oo busbuska ah. Waqtiga talaalladan la siinayana waxay ku xiran tahay qofka da'diisa. Su'aashaas weydii dhakhtarkaaga.

Talaalka busbuska waa lala qaadan karaa talaalada kale marka la qaadanayo.

> Ogoow: Talaalka busbuska wuxuu la socon karaa (ku darsanaan karaa) talaalada jadeecada-qamoow qashiirka -jadeeco jarmalka [measles-mumps-rubella (MMR)] oo ah talaal isku jira laguna magacaabo MMRV.

3 Dadka qaarkiis waa in aysan qaadan talaalka ama ay sugaan

- Dadku waa in aysan qaadan talaalka busbuska hadii ay horay weligood xasaasiyad/cadaanyo xun uga qaadaan gelatin(), antabiyootigga neomycin, ama talaal busbus oo ay mar hore qaateen.
- Dadka xanuun/jiro hoose ama mid dhexdhexaad ahi ay hayso xiliga talaalka loo balamiyey in ay qaataan waa in ay sida badan sugaan ilaa ay ka bogsoonayaan inta aysan qaadan talaalka busbuska kahor.
- Dumarka uurka leh waa in sugaan qaadashada talaalka busbuska ilaa ay ka dhalayaan. Dumarka waa in aysan uur qaadin ilaa 1(hal) bill marka laga talaalo busbuska kadib.
- Dadka qaarkiis waa in weydiiyaan/ ka xaqiijiyaan dhakhtarkooda in ay qaadan karaan talaalka busbuska iyo in kale, dadkaas waxaa ka mid noqon kara qof kasta oo:
  - Qaba cudurka HIV/AIDS ama cudur kale oo saameeya habdhiska difaaca jirka.
  - Lagu daweynayo dawooyin saameyn ku yeelanaya habdhiska difaaca jirka, sida dawada steroids, ilaa labo usbuuc iyo kabadan
  - Qaba nooc kansarka/kaankarada ka mid ah
  - Radation ama daawo laga daweynayo kansar/ kaankaro
- Dadka dhawaanahaan dhiig ama waxyaalaha dhiiga ku jira lagu shubay waa in ay weydiiyaan

dhakhtarkooda marka ay qaadan karaan talaalka busbuska.

Weydii dhakhtarkaaga ama kalkaaliye caafimaad wixii warbixin dheeraada ah.

4 Maxay yihiin khataraha ka imaan kara talaalka busbuska?

Qaadashada talaalka busbsuka ayaa ka badbaado badan in uu cudurka busbuska kugu dhaco. Dadka qaata talaalka busbuska badidoodu wax dhib ah kalama kulmaan talaalka.

Hase yeeshee, sida dawooyinka kaleba, talaalku, wuxuu awood u leeyahay in uu sababo dhibaatooyin waaweyn, sida xasaasiyad/cadaanyo aad u xun. Khatarta uu talaalka busbusku ku keeni karo dhibaato aad u weyn ama dhimasho, aad bey u yar tahay.

Dhibaatooyinka Dhexdhexaadka ah

- Xanuun ama barar fuula meeshii irbada/cirbada talaalka lagu muday (caruurta qiyaastii 5tii canugba 1 canug, da'yarta iyo dadka waaweyn 3 dii qofoodba 1 qof).
- Qandho (10 kii qofba 1 qof, ama ka yar).
- Shuruurac meel dhexaad ah, ilaa hal bil marka talaalka la qaato kadib (20 kii qofoodba 1 qof, ama ka yar). Waxaa macquul ah in dadkan ay u gudbiyaan cudurka xubnaha kale ee qoyskooda ka tirsan, laakiin arintan waa mid aad dhif u ah.

Ogoow: Talaalka MMRV ka waxaa lala xiriiriyaa in uu sida badan qandho leeyahay (5tii qofoodba 1 qof) iyo furuurac u eg furuuraca jadeecada (qiyaastii 20 kii qofoodba 1 qof) marka loo eego/barbardhigo hadii talaalka MMR ka iyo busbuska gooni gooni loo kala qaato.

Dhibaatooyin dhexdhexaadka ah

- Qallal (gariir xoog badan ama hal meel uun fiirinaya) oo ay sababtay qandho (1,000 (kun) kii qofoodba hal qof ama ka yar).

Dhibaatooyin Daran

- Nimooniya/koolba aaryo (aad dhif u ah).

Dhibaatooyinka kale ee aadka u daran, oo ay ka mid yihiin saameyn daran oo maskaxda ah iyo tirinta unugyada dhiiga oo hoos u dhaca, in ay dhacaan talaalka busbuska ayaa la soo weriyey. Waxyaalfhaan si dhif iyo naadir ah ayey u dhacaan khubaraduna ma sheegi karaan in uu talaalku sabab u yahay iyo in kale. Hadii uu talaalku sabab u yahay, arintani aad bey dhif u tahay.

5 Ka waran haddii dhib dhexdhexaad ah ama daran ay timaado?

Maxaan ku gartaa?

- Xaalad kasta oo aan caadi ahayn, sida qandha daran ama dabeecadda qofka oo isbedesha. Calaamadaha lagu garan karo in cadaanyo ba'an uu kiciyay waxaa ka mid ah neefsashada oo dhibta, codka oo xirma, xabeeb/xaneeg ama xiiqxiiq/neeftuur, furuurac cuncun leh, midabka gadoon/oo isbedela, tabar daro, wadnaha oo aad u garaaca ama wareer.

Maxaan sameeyaa?

- **Dhakhtar** wac, ama qofka isla markiiba dhakhtar ugee.
- **U sheeg** dhakhtar kaaga waxa dhacay, saacadda iyo maalinta sidaasi dhacday, iyo waqtigii talaalka la qaatay.
- **Waydii** dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaad, ama waaxda caafimaadka si aad u wariso dhibka talaalku keenay adigoo buuxinaaya foomka Vaccine Adverse Event Reporting System (VAERS).

Ama waxaad warbixintan ku gudbin kartaa bogga internetka ee VAERS ee www.vaers.hhs.gov, ama adigoo wacaya 1-800-822-7967.

VAERS talo caafimaad ma bixiso.

6 Barnaamijka Qaranka ee Magdhawga Dhaawaca Talaalka

Haddii lama filaan ay dahcdo oo adiga ama ilmahaaga uu talaalku ku kiciyo cadaanyo ba'an, waxaa la sameeyay barnaamij fadaraalku ku caawinaayo in lagu daboolo kharajka daryeelka qofka dhibaatadu ka soo gaartay talaalka.

Wixii faahfaahin ah ee ku saabsan National Vaccine Injury Compensation Program (Barnaamijka Qaranka ee Magdhawga Dhaawaca Talaalka), wac **1-800-338-2382** ama booqo boggooda internetka ee **www.hrsa.gov/vaccinecompensation**.

7 Sidee wax intaa ka badan u ogaan karaa?

- Weydii dhakhtar kaaga. Waxay ku siin karaan warqadda la socota talaalka ama waxay kuu sheegi karaan ila kale oo aad warbixin ka heli karto.
- Wac waaxda caafimaadka ee xaafaddaada ama maamul goboleedka (state).
- La xiriir Xarumaha ka Hortagga iyo La Dagaalanka Cudurada [Centers for Disease Control and Prevention (CDC)]:
  - Wac **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)**
  - Booqo boga internetka ee Barnaamijka Tallaalka Qaranka ee CDC ee: **www.cdc.gov/nip**

Wasaaradda Caafimaadka iyo Arrimaha Bulshada ee U.S
Xarunta ka Hortagga iyo la Dagaalanka Cudurada
Xarumaha Qaranka ee Talaalka iyo Cudurada Habdhiska Neefsashada

Vaccine Information Statement
Varicella (1/10/07) - Somali 42 U.S.C. § 300aa-26

Translation provided by the Minnesota Department of Health